



# Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee Arjiga Gargaarka Qoyska

Fadlan noo sheeg haddii foormkan aad ugu baahan tahay wax caawinaad ah ee la xiriira haddii aad tahay qof naafo ah ama aadan ku hadlin af Ingiriis darteed. Kaalmo bilaash ah ayaa helaysaa. La soo xiriir Lambarka Xarunta Adeegga Gaargaarka ee Qoyska kaas oo ah x866-311-4287 iyo/ama lambarka Qadka Dadka Maqalka ku Adag (TTY) oo ah 711. Haddii aad tahay qof naafo ah, waan ku soo wici karnaa ama waan ku soo booqan karnaa haddii xafiiskeena aadan noogu imaan karin. Ku qor luqaddaada Koowaad/Ee aad Doorbido\_\_\_\_\_

## QEYBTAN WAXAA ISTICMAALAYA OO KALIYA SHAQAALAH WAB [DHS] (THIS BOX TDHS USE ONLY)

Kiis #: \_\_\_\_\_  
taariikhda la heley: \_\_\_\_\_  
Deegaanka: \_\_\_\_\_

Arjigaaga waxaan kaa gudaymaynaa adiga oo ku qora kaliya magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga. Laakiin marka aad macluumaad badan foormka aad ku qorto, waxaa dhici karta in adiguna sida ugu dhaqsaha badan aad u ogaato haddii kaalmo aad heli karto iyo in kale. Haddii lagu ogolaado, manfacyadaada waxaa dhici karta in lagaaga bilaabo taariikhda arjiga aad inoo soo gudbisay. Badanaaba waxaad u baahnaa doontaa in aad la hadasho shaqaalaha TDHS si loo dhameystiro socodsiiinta arjigaaga.

Waxaa dhici karta in aad SNAP ku hesho 7 maalmood gudahooda haddii:

1. Daqliga qoyskaaga ka hooseeyo \$150, oo hadda aad haysato \$100 ama in ka yar.
2. Qarashka hoygaaga (lagu darey qarashka isticmaalka biyaha, korontada) uu ka badan yahay daqligaaga bisha loo geeyey inta kuu keydsan.
3. Aad ka shaqeyso shaqooyinka xiliyadda kooban ama aad tahay soo galooti xoogsato ah.

Haddii ay ku hayso naafonimo oo ayna kugu adagtahay in aad arjiga buuxiso ama aad fahamto waxa arjigan ku qoran, waan kaa caawin karnaa. Waan ku soo wici karnaa ama waan ku soo booqan karnaa haddii xafiiskeena aadan noogu imaan karin. Macaamiisha waxay arjiga manfacyada iyo waraaqaha caddaymaha keeni karaan xafiskooda degmada ama boosto ama fakiskan 615-313-2360 ayay ugu diri karaan, gacanta ayay ugu geyn karaan, ama qatka internetka ayay ugu gudbin karaa iyagoo booqda <https://faonlineapp.dhs.tn.gov/>.

<b>Magaca (Hore/Dh/Dambe)</b>			<b>Waxaan codsanayaa: ___Mudnaanta Qoyska [Families First] ___SNAP</b>		
<b>Cinwaanka Guriga</b>			Waxaa dhici karta in aan kaa soo wacno telfoonka guriga ama telfoonka gacanta si aan balanta kuu xusuusino. Fariin ayaan kuu duubi doonaa haddii aadan ka jawaabin.		
<b>Degmada</b>	<b>Gobolka</b>	<b>Zip Koodka</b>	<b>Telfoonka Guriga</b>	<b>Telfoonka Shaqada</b>	<b>Telfoonka Gacanta/Ko kale</b>
<b>Cinwaanka Warqadaha lagugu soo diro (haddii uu ka duwan yahay kan guriga)</b>			Waxaan isticmaalnaa Lambarada Soshal Sekiyuuritiga si loo hubiyo in adigu aad tahay qofka aad sheeganayso. Waxaan u isticmaalnaa si aan u hubino in aad hesho cadada saxda ah ee caawinaada ee aad adigu xaq uleedahay, in la bedello cadada caawinaad ee aad hesho, in la hubiyo diiwaangelinta kombiyuutarada dowladda, iyo si loo hubiyo in aad xaq u leedahay. Waxaan hubinaa Soshal Sekiyuuriti, IRS, iyo diiwaangelinta shaqada. Waxaa laga yaabaa inaan hubino Diiwaanka Laanta Adeegyada Muwaaddinnimada iyo Socdaalka ee Mareykanka [United States Citizenship and Immigration Services (USCIS)]. Haddii diiwaangelintan aysan iswaafaqsanayn waxa aad dhahayso, saameyn ayay ku yeelanaysaa haddii aad heli la'hayd caawimaad lacagta Mudnaanta Qoyska (Families First) ama SNAP ee heli la'hayd. Haddii aad bixiso macluumaad aan-sax-ahayn adigoo ulajeedaadu ay tahay in kaalmo aad ku hesho, xabsi ayaad ku mutaysan kartaa.		
<b>Cinwaanka Imelka</b>			Macluumaadka ku saabsan Isirka/Qowmiyadda aad ka soo jeedo, taas dowladda Tennessee waxay ka caawinnaysaa in ay u hog'aansan yihiin sharciyada xuquuqda dad-waynaha.		
Ma hooy laawey ayaad tahay: ( ) Haa ( ) Maya			Fadlan kuwa soo socda u isticmaal si jinsigaaga aad inoo sheegto: <b>C</b> = Caddaan, <b>M</b> = Madow/Afrikaan-Amerikaan, <b>A</b> = Asiyaan, <b>H</b> = Hawaiian/Jasiiradda Baasifigga oo Dhallad ah, <b>I</b> = Amerikaan Indiyaan/Alaska Dhallad ah ( <b>Dadka guri ku-wada nool uma baahna in ay na siiyaan macluumaadkan oo wax saamayn ah kuma yeelanayso xaq u yeelashadaada ama inta manfac ee lagu siinayo</b> )		
Ma waxaad u baahan tahay kaarka EBT ga? ( ) Haa ( ) Maya			<b>Xaaladda Guur:</b> Kuwa soo socda kiiba u isticmaal ubin kasta oo qaangaar ah ee aqalka qoyska ku nool: <b>xaasle, doob, isfurey, laga dhintey, kala maqan</b>		

Ku qor qof kasta ee aqalka qoyskaaga ku nool (adigana isku dar) Si aad ugu darto dad badan, fadlan arji kale ama warqad kale ku soo qor oo ku lifaaq	Manfac miyuu dalbanaya qofkan? (Haa/Maya)	(LOOMA baahna in aad ku soo qorto haddii qofka uusan rabin inuu manfac helo) Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, eeg bogga 1 <sup>aad</sup> ee Bayaanka Heshiiska Isfahamka		Jinsi (L/D h)	(Waa ikhtiyaar) Calaamadda saxda ah saar haddii aad tahay Hisbaanig/Latino	(Waa ikhtiyaar) Isirkaaga (kor fiiri) Kuwa ku quseeya oo dhan calaamadee	Xaaladda Guur (kor fiiri)	Taariikhda Dhalashada	Calaamadda saxda ah saar haddii qoftan ay uur leedahay	Calaamad da saxda ah saar haddii qofkan yahay qof naafonimo qabo
		Lambarka Soshal Sekiyuuritiga	Calaamadda saxda ah saar haddii aad haysato dhalashada Mareykanka							

Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanata si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].

Qaybin: FARAS (asal)

RDA: 1716

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay 04-21)

Bogga 1 oo ka kooban 3 bog

<p>Waxaan ku dhaaranayaa iyada oo aan ciqaab ku mutaysan karo beensheegida (sheegida hadallo been ah iyadoo lagu dhaaranayo) iyo dhammaan ciqaabada kale la mutaysan karo in wax been ah lagu daro qoraalka aan arjigan ku qorey, kuwa kulifaqaan, iyo qofkasta oo iwareysan doono yahay mid run oo sax ah. Dhammaan shaqsiyaadka caawinaada codsanaya ama kuwa caawinaada qaata ay yihiin kuwa haysta dhalashada Mareykan, sharci wadanka lagu joogo, ama soo galooti xaq uleh. Waan ogsoonahay oo waan kuu raacsan nahay shuruudaha iyo macluumaadka la i siiyay. Haddii la isoo weydiisto, waxaan bixin doonaa macluumaadka caddeynaya qoraalkayga, ama TDHS waxaan fasax u siiyay in ay caddeyn la timaado. Waan ogsoonahay in la iga rabo in TDHS aan u soo sheego isbadel kasta oo xaaladdayda ku timaada. <b>Waan fahamsanahay in macluumaadka aan ku bixiyay ay soo caddayn doonaan saraakiisha federaalka, gobolka, iyo kuwa maxalliga ah si loo go'aamiyo haddii macluumaadkaas uu yahay mid run ah.</b></p> <p><b>Bixinta:</b>Dowladda Gobolka Tennessee ama kuwa ushaqeyya waxaa dhici karta in ay ubaahdaan macluudka aan anigu siiyay yahay mid run ah oo iyagu soo hubsan doona. Aniga oo warqaddan saxiixaya, waxaan iyaga aan usheegayaa in ay soo caddeeyaan. Tani waxay u ogolaandoontaa in ay go'aamiyaan haddii la isiniyay SNAP ama Families First. Sidoo kale waxaan halkan ku caddaynayaa in aan aqriyay oo aan fahmay Bayaanka Heshiiska Isfahamka. <b>Haddii aad codsato SNAP, waxaa laga yaabaa in lagugu qaado in dib-u baarid lagu sameeyo Tayada. Macaamiisha waxay arjiga manfacyada iyo waraaqaha caddaymaha keeni karaan xafiiskooda degmada oo boosto ama fakiskan 615-313-2360 ayay ugu diri karaan, gacanta ayay ugu geyn karaan, ama qatka internetka ayay ugu gudbin karaa iyagoo booqda <a href="https://faonlineapp.dhs.tn.gov/">https://faonlineapp.dhs.tn.gov/</a>.</b></p> <p>Saxiix: _____ Taariikh: _____ Markhaati (haddii X lagu saxiixay): _____ Taariikh: _____ Mas'uul ama Wakiilka Awoodda loo siiyay: _____  Taariikh: _____</p>					
<p><b>SANDUUQAN waxaa loogu talagalay Families First kaliya: Idan lagu sii bixinayo diiwaangelinta isa soo xaadirista iskuulka</b></p> <p>Anigoo ah (macmiilka) iskuulka waxaan fasax usiinayaa in ay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiraanka caruurta ee arjigan ku qoran oo xogtaas la siiyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga dhigto. Waaxda Adeega Bulshada diiwaangelintan way isticmaali doontaa, iyadoo ay la socoto lambarada soshal sekiyuuritiga, waxay iga caawinaysaa inaan ka soo baxo waajibadyadeyda Mudnaanta Qoyska. Diiwangelinta waa la jejeexi doonaa mar haddii laga dhammaysto oo aanan loo baahnayn.</p> <p>Saxiix: _____ Taariikh: _____</p>		<p><b>Macluumaadkeyga waxaa lala wadaagi doonaa Buuggaagta Dhalashada aysan kahayn haddii aan diido.</b></p> <p>Halkan calaaddee si aad u diiddo ____.</p> <p>Miyaad diyaar u tahay in aad u hogaansanaato masruufka ilmaha (child support)? (FF Kaliya)</p> <p>Haa ____ ama Maya ____</p>		<p><b>Ma jeceshahay in aad hesho nuqul ka mid ah arjigaaga oo dhammaystiran?</b></p> <p>____ Haa ____ Maya</p> <p><b>Haddii ay sidaas tahay, miyaad doorbideysaa nuqul warqad ah ama nuqul elektaroonig ah?</b></p> <p>____ Nuqul Waraaq ah  ____ Nuqul elektaroonig ah</p>	
<p><b>Waxaan ogsoonahay in ay dhici karto in aan leeyahay hal ama laba ah wakiil aniga imataala:</b></p> <p>_____ oo aniga manfacyadan ii dalbi kara: SNAP ( ) ; Families First ( )  _____ manfacyada SNAP aniga ii isticmaalo ( ) ; aniga ii isticmaalo manfacyada Mudnaanta Qoyska ( )</p> <p>_____ oo aniga manfacyadan ii dalbi kara: SNAP ( ) ; Families First ( )  _____ manfacyada SNAP aniga ii isticmaalo ( ) ; aniga ii isticmaalo manfacyada Mudnaanta Qoyska ( )</p>					
<p><b>Diwaan-gelinta Coddeynta</b></p> <p>Ma iska diiwaangelisay halka aad degan tahay si aad coddayo? ( ) Haa ( ) Maya  Miyaad jeceshahay in coddeynta isu diiwaangeliso? ( ) Haa ( ) Maya  Ma jeceshahay in TDHS ay kuusoo dirto foormka diiwaangelinta coddeynta? ( ) Haa ( ) Maya  <b>Manfacyada laga yaabo inaad ka hesho xafiiska TDHS isma baddeli doonaan haddii aad isdiwangeliso in aad coddeyso ama in kaleba ma waxay kaa hor istaagaysaa in aad dalbato manfacyada.</b></p>					
<p><b>Sanduuqyada hoose ku qor macluumaad ku saabsan DAQLIGA aqalka qoyskaaga.</b>Daqligu waxaa ka mid ah balse kuma koobna oo kaliya kan shaqada, kan iskaa- aad ushaqeysto, masruuf, masruufka ilmaha, manfacyada dadka tabarta-daran, Soshal Sekiyuuriti/Daqliga Soshal Sekiyuuratiga, Magdhawga Shaqo, Manfacyada baagammuudo, lacagta howl-gabka, mushahar, iyo daqli dulsaar ah.</p>					
<p><b>Shaqsigu Dakhliga soo Gala canshuur/qarashaadka</b></p>		<p><b>Daqliga kaa soo galo (sida shaqada, Soshal Sekiyuuriti, masruufka ilmaha)</b></p>		<p><b>Lacagta bishi kasta canshuurta/qarashaadka ka hor</b></p>	
<p><b>Ku qor hantida ama halka dhaqaalaha qoyska ay ka helaan oo dhan sida (lacag naqdi, mid keydsan, jeekinka, ama koontada bangiga, keydsan, saaniyad, boond, mujawal fands, koontooyinka howl-gabka, tarasta fands, daqli-sanadle, ama hanti kale)</b></p> <p>Nooca: _____ Qiimaha:\$ _____ Nooca: _____ Qiimaha:\$ _____</p> <p>_____ Qiimaha:\$ _____ Nooca: _____ Qiimaha:\$ _____</p>					
<p>Xubin kasta oo qoyska ka tirsan ee jebiya mid ka mid ah xeerarkan waxaa dhici doonta in laga joojiyo in ay qaataan manfacyada barnaamij ka SNAP hal sanno ilaa iyo abad, lana ganaaxo in ka badan \$250,000, lana xiro in ka badan 20 sannadood ama labadaba. Sidoo kale isaga ama iyadu waxaa lagu qaadi doonaa tallaabo sharciga waafaqsan kaasoo hoos yimaada sharciyada Federaalka ama dowladda Gobolka. Waxaa dhici karta in isaga ama iyada laga mamnuuco in ay qaataan manfaca Barnaamijka SNAP ilaa 18 bilood oo dheeraad ah haddii ay maxkamadda amarto. Kaarka EBT ah badeshan, ama ha iska iiban, ama kaarka qof kale ah u oggolaan inuu isticmaalo.</p>					

**Waxaa laga yaabaa in manfacyadaada SNAP lagaa joojiyo haddi aad:**

- \*Nasiiso macluumaad aan jirin ama haddii aad wax naga qariso si aad u qaadatao manfacyada SNAP darteed;
- \*Isticmaasho Kaarka Manfaca oo qof kale lee yahay iyaga oo aan kuu fasaxin;
- \*Manfacyada SNAP aad ku soo iibsato sida qamri, sigaara, ama saabuun ama aad isaga guddo.

**Haddii xeerarkan aad jebiso, ma qaadan doontid manfacyada SNAP ilaa:**

1 sano waa marka koowaad ee lagugu qabto, marka labaad 2 sano, oo marka seddexaadna weligaaba ma qaadan doontid.

**Haddii manfacyada SNAP lagu siiyo aad daroogo ku baddelato. Manfacyada waa lagaa jari karaa ilaa:**

2 sano waa marka koowaad iyo marka labaad weligaaba ma qaadan doontid.

**Abid aya lagaa jari doonaa karaa Barnaamij SNAP in lagaa jaro haddii lagugu helo dembi ah in:**

- \*Manfacyada SNAP aad ku badellato hub, rassaas, ama walxaha qarxa ama walxaha kontorbaanka ah(muqaadaraadka sharci darada ah);
- \*Aad sii iibiso manfacyada SNAP ee udhigma \$500 ama ka badan.

**Ha sheegin macluumaad aan sax ahayn oo ku saabsan qofka aad adigu tahay ama halka aad deggan tahay si aad u qaadatao ama aad u hesho manfacyada SNAP. Haddii aad sheegto macluumaad aan jirin taasi waxay kaa horistaagi doontaa in 10 sannadood oo dhan aadan helin wax SNAP.**

**Dimbiile Dowladda Dhexe iyo/ama Dowladda Gobolka:**

Miyaa adiga ama qof kale oo degan aqalka qoyskaaga lagu heley dembi ah in aad qaadatey Caawinaada Kumeel-gaarka ee Qoyska (TANF) (Iacagta naqdigga ah) ama manfacyada SNAP oo isku mar ka wada qaadatey laba ama in ka badan oo gobol? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Miyuu qofna u isticmaalay lacagaha TANF meelaha soo socda: dukaamada khamriga, kasiinos, qolalka turubta, ganacsiga madadaalada dadka qaangaarka, hoolalka bingowga, tartanka orodka, iyo/ama dukaamada tafaariiqda ee shatiga leh oo laga helo iibkooda ugu badan tubaakada, sigaarka, sigaarka, dhuumaha, iyo qalabka kale ee sigaarka lagu cabo? (TANF kaliya)  
Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan weli ma lagu helay adigoo ama idinka oo iibsannaya ama sii iibinnayada manfacada SNAP oo ka badan \$500? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Adiga ama xubin qoyskaaga ka tirsan miyaa lagu xukumay dambi-wayn sababtoo ah dhaqan la xiriira haysashada, isticmaalka ama qaybinta walxahaha daroogada kontorbaanka laga soo bilaabo 08/22/96 (SNAP & TANF)? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Miyuu jiraa xubin qoyskaaga ka tirsan ama adiga oo dhuumaashi ama ka carraya sharci si aan dambi loogu qaadin darteed, aan la xirin darteeda, ama xabsi loo diro, lagu helo dambi, dambi-wayn ama gef(gefaf) u geystay sida, ama aanan waafaqsanayn gef u gaystay shuruudii tijaabada ama gefaf u gaystay tijaabayntii? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Adiga ama xubin ka tirsan qoyskaaga ma lagu helay dambi ah beddelashada SNAP lagu iibsida maandooriyayaasha? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

Ma jiraa qof aad codsaneysid oo lagu siiyay SNAP & TANF gobol kale 30kii maalmood ee la soo dhaafay? Haa \_\_\_\_ Maya \_\_\_\_

<p><b>Haddii aad tahay qof jira inta udhaxaysa 18 ilaa 24 sanno jir, adiga marka aad carruur ahayd abad ma gashay gacanta dowladda gobolka? Haa ___ Maya ___</b></p> <p><b>Qarashaadka Daryeelka Carruurta</b></p> <p>Inta sitimaankii aad bixiso: \$ _____</p> <p>Magaca qofka carruurta daryeela: _____</p>	<p><b>Qarashka Guryaha</b></p> <p>Ijaar / Deenta Guryaha (mid goobaabi geli)</p> <p>Bishiiba meeqaa: \$ _____</p> <p>Gaas/Korontada \$ _____ bishiiba</p> <p>Telfoon \$ _____ bishiiba</p>	<p><b>Qarashka Daawada</b></p> <p>Ku qor qarashka daawada sida takhtarka tan uu qor ama lacagta joogta ah ee caymiska la siiyo. Kuwani waxay kaa caawinayaan SNAP oo bada aad hesho haddii aad tahay qof da' ah ama itaal-daran.</p> <p>Nooca: _____ \$ _____ bishiiba</p> <p>Nooca: _____ \$ _____ bishiiba</p>	<p><b>Masruufka ilmaha ee aad Bixiso</b></p> <p>Haddii adiga sharci ahaan lagugu waajibiyay in aad <u>bixiso</u> masaruufka carruurta ee aad siiso canug ama carruur magacyadooda halkan ku qor:</p> <p>Canug: _____ \$ _____ bishiiba</p> <p>Canug: _____ \$ _____ bishiiba</p>
<p>Hey'addan waxaa ka mamnuucan in ay takoorta ayada oo sal uga dhigeysa jinsi, midab, asal qaran, lab/dhiddig, da, jinsi iyo mar marka qaarkood wax uu qofka aamisan yahay ee diinta ama siyaasad. Waaxda Beeraha ee Mareykanka sidoo kale waxay mamnuucaysaa takoorka lagu saleeyo isir, middab, asal qaran, jinsi, caqiido diin, naafonimo, da', aaminsanaan siyaasad ama aar-gudasho ama aargudsi howlo madani ee horey u dhacay eee barrnaamij kasta ama howlo ay maalgeliso ama ay qabatay USDA. Dadka naafada ah ee u baahan qaababka gaarka ah ee xariirka si ay uhelaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta indhoolka, farta waawayn, cod duuban, Luuqada Dhagoolka ee Maraykanka, iwm.), waa inay laxariira wakaalada (gobalka ama deegaanka) ay kacodsadeen gunooyinka. Shaqsiyaadka dhagaha la', dhagaha culus ama hadalka naafada ka ah waxay kala xariiri karaa USDA hanaanka Adeegyada Dhagoolayaasha ee Federaalka oo nambarkiisu yahay (800) 877-8339. Waxaa intaa dheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luqaddo kale oo aan Ingiriis ahayn. Si aad u gudbiso cabasho takoor oo ku aaddan Barnaamijka Xuquuqda Dad-weynaha USDA u soo dirsato, soo dhammaystir Foomka Cabashada Takoorka, (AD-3027), ee Barnaamijka USDA, oo aad ka helaysid qatka online-ka ee <a href="http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html">http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html</a>, iyo waxaad ka heli karto xafiis kasta ee USDA leedahay, ama waraaq u soo dir adigoo ku u sood iraya USDA oo warqaddana ku soo qor dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad ucodsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Foomkaaga oo buuxa ama waraaqdaada u soo dir USDA da: (1) boosto: U.S. Department of Agriculture Office of the Assistant Secretary for Civil Rights 1400 Independence Avenue, SW Washington, D.C. 20250-9410 (2) fakis: (202) 690-7442; ama (3) iimeel: <a href="mailto:program.intake@usda.gov">program.intake@usda.gov</a>. Wixii macluumaad ah ee kale ee ka hadlaya oo Dheeri ah Barnaamijka Gargaarka Nafaqada (SNAP), dadku waa inay la xiriiraan USDA SNAP Qatkooda Tooska oo lambarkoodu yahay (800) 221-5689, oo sidoo kale kujira Isbaanishka ama wac Lambarrada Macluumaadka Gobolka/Khadka Tooska ah (dhagsii xiriiriyaha liiska lambarada khadka tooska ah ee Gobolka); waxaa laga heli karaa interneetka: <a href="http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm">http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm</a>.</p> <p>Si aad u soo gudbiso cabasho takoor ee ku saabsan barnaamijka hela gargaar dhaqaale ee Dowladda dhaxe ah oo loo soo mariyo Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee Mareykanka (HHS), u qor HHS Director, Office for Civil Rights, Room 515-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 or call (202) 619-0403 (voice) or (800) 537-7697 (TTY). Hay'addan waa hay'ad fursadda ay fidiso dadka u wada sinta. Waxaad kaloo u qori kartaa Tennessee, Department of Human Services, Office of General Counsel, Compliance Officer, James K. Polk Building, 500 Deaderick Street, Nashville, TN 37243, (615) 313-4700.</p>			

Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].

Qaybin: FARAS (asal)

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

RDA: 1716

Bogga 3 oo ka kooban 3 bog



**Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee [Tennessee Department of Human Services]  
Bayaanka Heshiiska – Shuruucdaha Barnaamijka (Arjiga lagu Daray)**

**Waa muhiim – Warqaddan Xafid!**

**Nuqulka Macaamiilka**

Ma ubaahan tahay in wax isbaddel ah oo aad noo sheegayso? Ma qabtaa wax su'aal ah? Ma u baahan tahay caawinaad? Na soo wac. Wacidaan waa bilaash.

**Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska - 1-866-311-4287**

Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino laga bilaabo 8 a.m. ilaa iyo 4:30 p.m. CST, Isniinta ilaa Jamcaha.

Haddii aad qabto itaal-la'aan oo aadna u baahan tahay gaargaar gaar ah, fadlan nala soo socodsii.

**TURJUMAANNO BILAASH AH** -- Haddii af Ingiriisiga aadan si wanaagsan u fahmeyn oo aad caawinaad u baahan tahay, fadlan nala soo socodsii. Waxaan kuu keeni doonaa turjumaan oo kaa caawin doona in aad nala hadasho. Adeeggan waa mid bilaash ah. Keenista turjumaanka kama dhigi doonto in ay daahiso socodsiinta kiiskaaga. Weli arjigaaga waan kaa guddoomi doonaa maanta.

**Xafiiska DHS waxaad ka soo dalban kartaa manfaca Mudnaanta Qoyska [Family First], ama SNAP.** Arjigaaga waxaan kaa gudahmaynaa adiga oo ku qora kaliya magacaaga, cinwaankaaga, iyo saxiixaaga. Macaamiisha waxay arjiga manfacyada iyo waraaqaha caddaymaha keeni karaan xafiiskooda degmada oo boosto ama fakiskan 615-313-2360 ayay ugu diri karaan, gacanta ayay ugu geyn karaan, ama qatka internetka ayay ugu gudbin karaa iyadoo booqda <https://faonlineapp.dhs.tn.gov/>. Arji iyo wareysi waa in la buuxiyaa. Arjiga DHS waxaa laga heli karaa qatka internetka oona lagu dhameystiri karaa xafiiska DHS. Foormkan waxaad u adeegsan kartaa si aad ugu xajiso codsi mid (1) ama labada barnaamijba. Arjigaaga SNAP kaliya looma diidayo iyadoo lagu salaynayo in arjigaaga oo aad barnaamij kale ku dalbanayso oo kaliya lagugu diido. Waxaan arjigaaga ku wadi doonaa codsiyada SNAP si waafaqsan nidaamka SNAP, oo ay ku jiraan wareegyada waqtiga iyo shuruudaha Dhageysiga Caddaaladda, iyadoo aan loo eegin haddii codsiga yahay SNAP iyo Families First. Waa in aad na siisaa caddeyn ah qofka aad tahay, daqligaaga, iyo xaqiiqooyin kale ee loo baahan yahay si loo ogolaado arjigaaga. Haddii aad caawinaad ugu baahan tahay in caddeynta aad hesho, weydii shaqaalaha kiiskaaga ee DHS.

Haddii adiga ama shaqsi kale oo aad u dalbayso xaq u yeelashada manfaca, manfacyada SNAP ama Families First waxaa la siin doonaa laga bilaabo taariikhda aan helno arjiga oo ku qoran magacaaga, cinwaankaaga iyo saxiixaaga. Taariikhda la soo dalbaday way ka duwaan doontaa haddii aqalka qoyska ay ku jiraan xabsi oo isla markaana soo dalbannayan manfaca SNAP iyo Daqliga Soshal Sekiyuuratiga [SSI]. Kiiska markii uu sida yahay, taariikhda la soo gudbiyay waxaa looga bilaabayaa taariikhda qofka xabsiga laga soo daayo.

- **Qofkasta oo ka tirsan aqalka qoyska oo dalbanaya manfacyada Families First ama SNAP** waa inuu bixiyaa Lambarka Badbaadada Bulshada [Social Security Number] ama sharcigooda dhalashada ama laanta socdaalka. Xeerka Nafaqada iyo Cuntada wuxuu noo ogolaadaa in Lambarada Soshal Sekiyuuritiga aan isticmaalno si aan markaa u hubino in aad heleyso caddada saxda ah ee gaargaar, la beddelo caddada saxda ah ee aad hesho, si aan uga fiirino diiwaangelinta dowladda iyo kombiyuutarada, iyo si aan u hubino in aad gargaarka u qalanto. Goorta aan diiwaangelinta kombiyuutarada ka eegeyno, waxaan isticmaalnaa Nidaam Lagu Cadeeyo Xaq u la'haanshaha Daqliga. Haddii diiwaangelintan aysan iswaafaqsanayn waxa aad dhahayso, saameyn ayay ku yeelanaysaa haddii aad heli la'hayd caawimaad iyo inta lacag ama SNAP ee heli la'hayd. Haddii aadan haysan lambarada Soshal Sekiyuuritiga, waan ku caawin karnaa in aad mid weydiisato.
- Haddii aad haysato Lambarka Soshal Sekiyuuritiga, oo aad tahay muwaadin Mareykan ah, ama aad haysato sharci degnaanshaha ama soo galooti xaq u leh, markaa waa in aad manfacyada aad soo dalbataa haddii aad tahay xubin qoyska ka mid ah.

*Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanata si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

RDA: 1716

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay 04-21)

Bogga 1 oo ka kooban 8 bog

- Tusaale ahaan: Sayga/xaaska iyo caruurta iyo waalidiintooda waa in ay isla soo dalbadaan, aysan ka ahayn haddii aad iska dhaafeyso in aadan u dalabto manfacyada qof aanan dooneyn in uu bixiyo Lambarada Soshal Sekiyuuritiga (SSN) ama xaaladdooda degnaansho.
- Xafiiska DHS **uma baahna** lambarrada Soshal Sekiyuuratiga ama sharciga dhalashada/soo galootiga si xubnaha qoyska ay manfacyo u dalbadaan. Haddii Lambar Soshal Sekiyuuriti uu la yimaado qof aanan ka ahayn qofka manfaca dalbanaya, looma dirayo Adeegyada Muwaadinnimada iyo Socdaalka ee Mareykanka (Immigration and Naturalization Services) si loo caddeeyo xaaladdooda degnaansho.
- Waad dalban kartaa manfacyada ee mawaadinniita iyo xaq u la'haanshaha soo galootiga xitaa haddii aadan adiga dalbanayn manfacyada.
- Xaaladda muwaadinnimada ee xubin qoyska ka tirsan qoyska codsadhaha ayaa laga yaabaa inay ku xiran tahay xaqiijinta USCIS iyada oo loo marayo gudbinta macluumaadka dalabka USCIS iyo in macluumaadka la gudbiyey ee laga helay USCIS ay saameyn ku yeelan karto u-qalmiitanka iyo heerka manfacayada qoyska.

Shaqsiyaadka aan manfacyada soo dalbanayn ayaa sidoo kale weli la xisaabi doonaa daqliga soo gala iyo lacagaha kale ee soo gala.

### **Haddii xafiiska DHS aad caawinaad ka dalbanayso, waxaa laga yaabaa in aan Lambarkaaga Soshal Sekiyuuratiga aan siino:**

- Bilayska raadinaya kuwa sharciga jabinaya waxaan bixinnaynaa goorta sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay ama goorta ay maxkamadda inagu amarto.
- Hay'addaha kale ee dowladda dhexe ama gobolka haddii sharciga inoo ogol yahay ama inooga baahan yahay in aan bixino.

Aruurinta macluumaadka arjiga ku qoran, oo ay kujirto SSN, waxaa loo oggol yahay Xeerka Cuntada iyo Nafaqada ee 2008 ee wax laga beddelay, 7 USC 2011-2036. Macluumaadka ayaa loo isticmaali doonaa si loo go'aamiyo haddii reerkaagu u qalmo ama uu sii wado inuu u qalmo kaqeybgalka SNAP. Waxaan ku xaqiijin doonaa macluumaadkan barnaamijyada waafijinta kumbuyuutarka. Macluumaadkan waxaa sidoo kale loo isticmaali doonaa in lagula socdo u hogaansanaanta xeerarka barnaamijka iyo maareynta barnaamijka.

### **Ilaa intee ayay inagu qaadanaysaa in arjigaaga aan go'aan ka gaarno?**

- Manfacyada Families First ee lacagta naqdiga ah: Waxaan haysanaa ilaa afartan-iyo-shan (45) maalmood oo aan go'aan uga gaarayno haddii lagu siin karo.
- SNAP: Waxay qaadan kartaa ilaa soddon (30) maalmood in aan go'aamino haddii aan ku siinayno SNAP waa haddii aad u qalanto.
- Si waqtiga loogu talagaley aan go'aan uga gaarno, xafiiska DHS waa inaad naga kaaleysaa si aan u heli la'hayn dhamaan caddeymaha aan u baahan nahay.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa kuu sheegi doona isbadellada lagaa doonayo in aad soo sheegto. Haddii Families First aad qaadato, waa in aad 10 maalmood gudahooda ku soo wargelisaa xafiiska DHS (Waaxda Adeegga Bulshada) isbadel kasta ee ku yimaada xaaladdaada nolol toban (10) maalmood gudahood.

Haddii aad hesho SNAP oo lagu fududeeyo Warbixinta, adiga **waa inuu** uga warbixi isbeddelada soo socda tobnaad (10<sup>ka</sup>) maalinta bisha ku xigta ka dib isbeddelada dhacay.

- Marka dakhliga guud ee bishii soo gala reerku ka sarreeyo Xadka Dakhliga Wadarta Guud ee SNAP ee tirada qoyskaaga,
- Mar kasta oo qof weyn oo awood ku leh shuruudaha shaqada saacadaha shaqadoodu ay ka hooseeyaan labataan (20) saacadood usbuucii ama siddeetan (80) saacadood celcelis ahaan bishii, iyo
- Marka xubin qoyska ka tirsan uu ku guuleysto lacag bakhtiyaa-nasiino la taaban karo ama qamaarka.

*Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

RDA: 1716

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

Bogga 2 oo ka kooban 8 bog

Shaqaalahaaga ayaa kuu sheegi doona inta ay tahay caddada.

**Manfacyada SNAP wax kama baddeleyso manfacyadaada Families First.** Haddii ay joogsato lacagta naqdiga ah ee Families First, weli waad heli kartaa manfacyada SNAP. Laakiin haddii aad bilowdo in aad qaadto Mudnaanta Qoyska, waxaa dhici karta manfacyada SNAP ee aad qaadato ay hoos u dhacdo. **Isbadelkan waa lagu soo wargelin doonaa; Inkastoo, ay dhici karto in isbadelkan kugu soo gaarto in yar tobon (10) maalmood ka hor inta manfacyada SNAP ay hoos u dhicin.**

**Waxaa laga yaabaa in manfacyadaada SNAP lagaa joojiyo haddi aad:**

- Nasiiso macluumaad aan jirin ama haddii aad wax naga qariso si aad u qaadato manfacyada SNAP;
- Aad isticmaasho Kaarka Ammaanka Manfaca [Benefit Security Card] ee qof kale lee yahay iyaga oo aan idan ku siin ama aad ka badellato ama iibiso Kaarka Ammaanka Manfaca;
- Manfacayda SNAP aad ku soo iibsato sida qamri, sigaar, ama saabuun,
- Ku bixi akoonnada amaahda ama ku bixi cuntada lagu iibsado deyn ahaan manfacyada SNAP.

**Haddii xeerarkan aad jebiso, ma qaadan doontid manfacyada SNAP ilaa:**

- Marka koowaad (1) sano
- Marka labaad laba (2) sanaddood.
- Marka seddexaad weligaaba.

**Haddii aad u isticmaasho ama aad ku hesho macaash macaamil ganacsi ku lug leh iibinta daroogada ama shay maandooriyo ah waa lagaa jari karaa:**

- Marka koowaad laba (2) sano
- Marka labaad weligaaba.

**Abadkeedaba waxaa dhici karta in lagaa jaro Barnaamijka SNAP haddii ay maxkamadda kugu caddeeyso in aad gashey dembi ah:**

- Manfacyada SNAP u baddelatay qori, rassaas, ama waxyaabaha qarxa.
- Aad sii iibiso manfacyada SNAP ee udhigma \$500 ama ka badan.

**Manfacyada SNAP ma heli doontid ilaa toban (10) sannadood haddii aad been ka sheegto qofka aad adigu tahay ama halka aad ku nooshahay si aad u hesho manfacyada SNAP.**

Haddii aaddan raacin qorshaha Families First, waxaa dhici karta inaan jarno lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska ama manfacyada SNAP la yareeyo.

**Haddii aad ka warbixin daqligaaga shaqada ama lagugu helo in aad jebisey shuruudaha Barnaamijka SNAP adiga oo ulakac u sameeyey, waxaa laga yaabaa in lagu weydiisto in aad soo celiso lacagtii lagu siiy haddii aad qaadatay manfacyo badan oo SNAP ah.**

**Dadka jebiya sharciyaddan waxaa dhici karta in ay xabsi ku mutaystaan, ee uu qabto sharciga dowladda dhexe, ama la ganaaxo ilaa iyo \$10,000 ah. Haddii dacwad SNAP ah ay soo baxdo oo lid ku ah aqalka qoyskaaga, macluumaad ku qoran arjigan, oo uu ku jiro lambarka SSN, waxaa dhici karta in lagugu wareejiyo hay'addaha dowladda Federaalka ama tan Gobolka, sidoo kale hay'addaha lacag ururinta u qaabilsan ee gaarka loo leeyahay, si tallaabo lacag ururin ay qaadaan.**

*Shaqaalaha [Waxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

*Qaybin: FARAS (asal)*

*HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21))*

*RDA: 1716*

*Bogga 3 oo ka kooban 8 bog*

**Mid ama in kabadan oo kamid ah xubnaha reerkaaga ayaa looga baahanyahay inay buuxiyaan shuruudaha diiwaangelinta shaqada si ay xaq ugu yeeshaan inay helaan manfacyada SNAP.** Shuruudaha Diiwaangelinta Shaqada: 1. Isdiiwaangelinta shaqada (diiwaangelinta shaqada waa la dhammeeyaa markii la saxiixo arjiga ama dib-u-cusboonaysiinta foomka ama la xiriir hay'addayada si aad ugu darto shaqsi kiiskaaga SNAP, iyo macluumaadkaanna ay diiwaangeliso hay'adda); 2. Bixi macluumaad ku filan oo ku saabsan xaaladda shaqada iyo helitaanka markii la codsado; 3. Aqbal shaqo ku habboon soddon (30) saacadood ama ka badan usbuucii, haddii lagu siiyo; 4. Waa in aaddan ka tagin shaqada, marka lagu shaqaaleeyo; iyo 5. Si iskaaga u dalbato in lagaa dhimo saacadaha shaqada. Ku guuldareysiga inaad raacdo shuruudaha kor ku xusan, sabab la'aan, waxay sababi kartaa luminta manfacyada SNAP ee mudooyinka soo socda: 1<sup>aad</sup> dembi-hal (1) bil; 2<sup>aad</sup> dembi-saddex (3) bilood ama 3<sup>aad</sup> ama dambi ka badan-lix (6) bilood. Waa inaad soo sheegtaa haddii wadarta guud ee dakhliga qoyskaagu bil kasta ka sarreeyo heerarka dakhliga ee tirada qoyskaaga ama haddii qof kasta oo da'diisu tahay siddeed iyo toban (18) ilaa afartan iyo sagaal (49) uu hoos u dhac ku yimaado saacadaha shaqada ee ka hooseeya labaaatan (20) saacadood toddobaad kasta. Isbeddelkan waa in lagu soo wargeliyaa tobanka tobnaad (10<sup>aad</sup>) maalinta bisha xigta isbeddelka. Ilaha soo socda ayaa kaa caawin kara inaad shaqo hesho: 1. Shaqada iyo Tabbabarka SNAP (SNAP E & T); 2. [www.Jobs4tn.gov](http://www.Jobs4tn.gov); 3. Xafiiska maxaliga ee Waaxda Hormarinta Shaqada iyo Shaqaalaha (Department of Labor and Workforce Development); 4 Sidoo kale waxaa la heli karaa ilooyin kale.

ABAWD waa qof qaangaar ah oo aan haysan qof ku tiirsaneyn inta u dhexeysa da'da siddeed iyo toban (18) ilaa afartan iyo sagaal (49) ee qoyska, haddii kale laga dhaafo, wuxuu u qalmi karaa oo keliya seddex (3) bilood oo ah gargaarka manfacyada SNAP saddexdiiba (3) muddada sanadka ilaa ay kaqeybgalayaan shuruudaha shaqada SNAP. Laga bilaabo 1da Janaayo, 2019, shuruudaha shaqada ABAWD SNAP waxay noqon doonaan:

- Shaqee ugu yaraan isku celcelis ahaan labaaatan (20) saacadood usbuucii siddeetan (80) saac bishii) ama ka badan, AMA
- Kaqeybqaado barnaami tabbar oo aad ugu qalmi karto isku celcelis ahaan labaaatan (20) saacadood usbuucii [sideetan (80) saacadood bishii] ama in ka badan.

Barnaamij tabbar oo aad ugu qalmi karto waxaa laga bixiyaa oo loo soo maraa Waaxda Horumarinta Shaqada iyo Shaqaalaha ee Gobolka oo waxay noqon karaan:

- Barnaamij hoos yimaada Sharciga Hal-abuurka iyo Fursadaha Shaqaalaha;
- Barnaamij hoos yimaada qeybta 236 ee Xeerka Ganacsi ee 1974; AMA
- Dhigashada fasallada Waxbarashada Aassaasi ee Dadka Qaangaarka (ABE)

Kaqeybgalayaasha ABAWD waxay xaq u yeelan doonaan oo kaliya inay helaan gargaarka manfacyada SNAP muddo seddex (3) bilood ah soddon iyo lix (36) bilood ama seddex (3) sano laga bilaabo 1<sup>da</sup> Janaayo, 2019.

**Waxaa laga yaabaa in aad hesho manfaco badan ee SNAP haddii aad u qalanto oo aad hayso caddeymo ah qarsh sida kuwan soo socda:**

- Caafimaadka;
- Xannaanayn caruur ama qof mas'uul aad ka tahay;
- Amarka masruufka ilmaha; ama
- Hoy ama qarashka isticmaalka biyaha, korontada

*Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

RDA: 1716

Bogga 4 oo ka kooban 8 bog

**Shaqaalahaaga xafiiska DHS ayaa kaa caawin kara in aad hesho caddeymo.** Laakiin waa in aad nagu soo wargelisaa qarashyada oo waa in caddeymo aad na tustaa. Haddii qarashkan aadan inoo sheegin oo aadan na siin waxii caddeyn ah, waxaan u qaadnaynaa in aadan doonayn in laga jaro qarashka kaaga baxa oo ma haleysid manfacyada SNAP dheeraad ah ee lagu siin la'haa.

### **Macluumaadka Families First:**

Haddii aad qaadato lacagta naqdiga ee Families First ee aadan u qalmayn, waa in aad Gobolka dib ugu soo celisaa. Waxaad awoodi kartaa:

- In aad ka bixiso lacagta naqdiga ee Families First.
- Lacag naqdi ahaan ku bixiso, haddii Families First aad qaadnaynin.

Haddii aad bixiso macluumaad aan jirin ama xaqiiqda aad qariso si aad u hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, maxkamadda ayaa lagu saari karaa. Waxaa lagugu eedeeyn karaa been abuur (adigoo dhaar qaba been sheegay), xatooyo ama dembi kale, oo waxaa laga yaabaa in waqti lagu xero oo aad xabsi ku gasho. Haddii aad si ulakac ah u jebiso jebiso shuruudaha Mudnaanta Qoyska, tani waxaan ugu yeeraanaa Xadgudub Barnaamijka oo Ulakac ah. Haddii dambi lagu helo, waxaa manfacyada Mudnaanta Qoyska lagaa jari karaa ilaa:

- Marka ugu horeyso lix (6) bilood
- Marka labaad hal (10 sano; oo
- Marka seddexaad weligaaba

Waa sharci daro in aad laba gobol isla mar ka wada qaadato lacag naqdi ah. Qof kasta oo sidaa sameeya waxaa laga yaabaa in lacagta naqdiga laga jaro ilaa iyo toban (10) sanadood.

Waxaa kaa mamnuucan in Kaarka EBT aad u isticmaasho goobahan soo socdo, dukaamada khamriga, kasiinos, qolalka turubta, ganacsiga madadaalada dadka qaangaarka, hoolalka bingowga, tartanka orodka, iyo dukaamada tafaariiqda ee shatiga leh oo laga helo iibkooda ugu badan tubaakada, sigaarka, sigaarka, dhuumaha, iyo qalabka kale ee sigaarka lagu cabo. Haddii aad jabiso qodobkan, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso lacagtii lagaa aad ku iibsatay dambiga koowaad iyo kan labaad. Xadgudubka saddexaad, daryeelaha reerkaaga waxaa loo aqoonsan karaa inuu si joogto ah aanu ugu qalmin inuu isticmaalo Kaarka EBT ujeeddadiisuna tahay helitaanka lacagta naqdiga ee families first ee lacagta naqdiga, iyo lacag-haye ilaalin ah ayaa loo qoondayn karaa inuu galo oo maamulo dheefaha ugu horreeya ee qoysaska.

### **Carruurtaada Mudnaanta Qoyska way heli karaan AMA manfacyada SNA balse adigu ma heli kartid haddii adigu aad tahay:**

- Dambiile cararaya
- Maxbuusle edeb lagu daayay ama xad gudub ku sameeyey tijaabo lagu eego edebta maxbiislaha
- Lagu heley dambi daroogo la xiriira ee la galey inta ka dambeeysey 22<sup>ka</sup> Agoosto, 1996, aysan ka ahayn haddii aad ka soo baxdo waxyaabo gaar ah.

Shaqaalaha kiiskaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxyaabaha ka baxsan.

**Si aad uhesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska, waa in aad saxiixdaa oo aad raacdaa Qorshaha Mas'uuliyadda Shaqiga.** Qorshahan waxaa laga yaabaa in uu kaaga baahan yahay in aad qabato howlo shaqo iyo/ama waxbarasho la xiriira.

### **Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan Masruufka Caruurta (Child Support) iyo Mudnaanta Qoyska (Families First):**

**Waxaa laga yaabaa in isla mar aad wada hesho lacagta naqdiga ee Mudnaanta Qoyska iyo masaruufka caruurta.** Haddii aad qaadato Mudnaanta Qoyska, waa in aad naga caawisaa in aad inoo cadeyso canuga aabahii dhalay. Sidoo kale waa in aad nala shaqeysaa si aan uga

*Shaqaalaha [Waxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

RDA: 1716

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

Bogga 5 oo ka kooban 8 bog



qaadno masaruufka canuga ee caruurta hela manfacyada Mudnaanta Qoyska. Inaga iskuma dayi doono in aan masaruuf ka qaadno haddii aad inoo caddeysa in ay jiraan sababo wanaagsan oo ah in aadan taa sameyn karin. Dhammaan masaruufka ilmaha waa in marka hore gacanta loo geliyaa xafiiska DHS. Haddii waalidka si toos ah uu lacag kuu siiyo, waa in lacagta aad u soo dirtaa xafiiska DHS. **Waxaa laga yaabaa in lagu siiyo masaruufka caruurta oo dhan ama qaar ka mid ah in dib laguugu soo celiyo.** Waxaan ugu yeeraan lacagahan masaruufka canuga ee inaga nala soo mariyo.

Xaddiga masaruufkaaga canuga inaga nala soo mariyo taas waxay ku xiran tahay “baahidaada aan la buuxin” iyo caddada masaruufka ee lagu siiyay midkooda. Inaga ayaa xisaabayna baahidaada aan la buuxin oo waxaan ku saleyneyna:

- Inta qof ee looga talagalay lacagta lagu siiyo ee aad ka hesho Mudnaanta Qoyska.
- Inta ay la eg tahay daqliga kale ee ku soo gala
- Shaqaalaha kiiskaaga ee DHS waxaad weydiin kartaa inta ay tahay caddada baahidaada aanla dabuulin.

**Ma dooneysaa in aad isqorto si aad u codeyso doorashada soo socta?** Sharciga dowladda dhexe iyo sharciga gobolba ayaa nagu qasbaya in aan ku weydiino haddii aad dooneyso in aad iska diiwaangeliso si aad u codeyso. Su'aashan waxaa lagu waydiin doonaa mar kasta oo aad manfac soo dalbato ama aad dib u dalbaneyso, marka dib laguugu ogolaado manfacyada, ama haddii aad na soo wacdo oo aad noo sheegto in aad guurtay. Foormamka dhan buuxintooda inaga ayaa kaa caawin doona.

#### **Macluumaadka Diiwaangelinta Codeynta:**

- Manfacyada laga yaabo inaad ka hesho xafiiska WAB isma baddeli doonaan haddii aad isdiiwangeliso in aad coddeysa ama in kaleba.
- Waxaan kaa caawin karnaa inaad codsato inaad isdiiwaan geliso si aad u codeyso. Go'aanka ah in caawinaad aad doonaysid iyo in kale adigaa iskaleh. Foormka si qarsoon aad u buuxin kartaa.
- Waxaad cabasho udirsan kartaa Xafiiska Isduwaha Doorashooyinka Coordinator of Elections, Secretary of State's Office, William R. Snodgrass-Tennessee Tower, 312 Rosa L Parks Ave, Nashville, TN 37243, 1-615-741-7956, Tennessee Relay Center, 1-800-848-0299, haddii aad rumaysan tahay:
  - In qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah in aad isdiiwaangeliso ama qof kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
  - In qof faragalin ku sameeyey xuquuqdaada ah qarsoodiga oo kuu diidey in aad isdiiwangeliso si aad u codeyso.
- Haddii aad doorato in aad isdiiwaangeliso ama diido, uma sheegi doono cid ka baxsan guddiga doorashada arrinka ah dalabkaaga ama halka aad ka buuxisay. Tani waxa kaliya aan u isticmaali doonaa diiwaangelin awgeed.
- Guddiga Doorashada Degmada ayaa fiirin doonaya haddii aad isdiiwaangelin karto si aad u codeyso. Tan DHS **ma** samayso.
- Haddii aad tahay qof iska diiwaangeliyay inuu codeeyo, Guddiga Doorashada ayaa kuu soo diri doona kaarka diiwaangelinta codbixiyaha. Haddii kaarka uusan kugu soo gaarin seddex sitimaan gudahood, ka xaqiiji Guddiga Doorashada.
- Haddii arjigaaga aad boosto ugu dirto xafiiska doorashada ee degmadaada, marka ugu horeyso ee aad codeyneyso waa in aad isgaysaa oo aad soo codeysaa.
- Waxaan boostada kuugu soo diri doonaa foormka “Arji Boosto ee Isdiiwangelinta Doortaha” soddon (30) maalmood gudahooda haddii aad telfoon inoogu sheegeyso, interneetka. ama boosto ingoogu soo gudbineyso:
  - Beddel cinwaan
  - Arjiga

*Shaqaalaha [Waxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan “Foormamka” qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the “Forms” section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

RDA: 1716

Bogga 6 oo ka kooban 8 bog

- Dib-u-dalbasho
- Dib-u-cusbooneynta
- Dib-u-eegid

Haddii waqtiga la isdiiwaangeliyo ka dhiman yahay in ka yar sodon (30) maalmood, foormka waxaan kuu soo diri doonaa shan (5) maalin gudahooda ama maalmaha shaqada ee xigta haddii aan karno.

### **HIPAA:**

Sharciga dowlada dhexe ee **HIPAA** wuxuu qorayaa waa in aan xafidnaa xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga si qarsoodi ah. Sidoo kale sharciga wuxuu leeyahay waa in aan ogeysiis ku siinaa. Waakuwan xeerarka la inooga baahan yahay in aan raacno si aan u xifdinno xaqiiqooyinka ku saabsan caafimaadkaaga qarsoodiga. Xeerarkan way isbaddeli karaan. Haddii isbaddel muhiim ah la sameeyo, inaga ayaa kuu soo sheegi doona.

### **Si loo go'aamiyo in aad xaq u leedahay Families First, Waxaa laga yaabaa in DHS ay macluumaadka caafimaadkaaga qarsoodiga ah la wadaagto:**

- Qaar ka mid ah shaqaalaha Waaxda oo u baahan in ay go'aamiyaan haddii aad qaadan karto manfaca Families First
- Sidoo kale DHS waxaa laga yaabaa in ay macluumaadkaaga caafimaadka qarsoon la wadaagto Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee dowladda dhexe maxaa yeeley waxay bixiyaan oo ay kormeeraan barnaamijka Mudnaanta Qoyska.

### **Bayaanka Takoor La'aanta ee USDA**

Waaxda Beeraha ee Mareykanka sidoo kale waxay mamnuucaysaa takoorka lagu saleeyo jinsi, middab, asal qaran jinsiga, caqiidada diinta, naafanimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed ama aargudasho ama aargoosi hore oo sokeeye ah xuquuqda maddaniga ee barnaamij kasta ama hawl kasta oo ay qabato ama maalgeliso USDA.

Dadka naafada ah ee u baahan qaabab kale oo xog gaarsiin ah oo loogu talagalay macluumaadka barnaamijka (tusaale ahaan farta indhoolayaasha, daabacaad farta waa wayn, cajalad maqal ah, Luqadda Dhagoolayaasha Mareykanka, iwm.), Waa inay la xiriiraan Hay'adda (Gobolka ama dowladda maxaliga) halka ay manfacha ka dalbadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag ama hadalka naafada ka ah waxay kala xariiri karaa USDA hanaanka Adeegyada Dhagoolayaasha ee Federaalka oo nambarkiisu yahay (800) 877-8339. Intaa waxaa sii dheer, Macluumaadka barnaamijka ayaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriiska.

Si aad cabasho uga gudbiso takoorka barnaamijku kukacay, buuxi Foomka USDA Program Discrimination Complaint (Cabashada Takoorka Barnamiika USDA) Foomka Cabashada (AD-3027), waxaa laga helaa qatka interneetka ee:

[http://www.ascr.usda.gov/complaint\\_filing\\_cust.html](http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html), iyo xafiis kasta oo USDA ah, ama u qor warqad

ku socota Waaxda USDA oo warqaddana ku soo qor dhammaan macluumaadka lagu codsaday foomka. Si aad u codsato nuqulka foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Ugu gudbi foomkaaga aad buuxisay USDA ku soo dir:

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture  
Office of the Assistant Secretary for Civil Rights

*Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

RDA: 1716

Bogga 7 oo ka kooban 8 bog

1400 Independence Avenue, SW  
Washington, D.C. 20250-9410  
(2) fakis: (202) 690-7442; ama  
(3) iimeel: [program.intake@usda.gov](mailto:program.intake@usda.gov).

Wixii macluumaad dheeri ah ee la xiriira Barnaamijka Gargaarka ee Kabka Nafaqada (SNAP) la xiriira ah, dadku waa inay la xiriiraan USDA SNAP Khadka Tooska ah ee (800) 221-5689, kaas oo sidoo kale lagugu caawin karo af Isbaanish ama wac Nambarka Macluumaadka Gobolka/Khadka Tooska ah (guji xiriirinta liiska lambarada khadka tooska ah ee Gobolka); oo waxaa laga helaa qatka nterneetka:  
[http://www.fns.usda.gov/snap/contact\\_info/hotlines.htm](http://www.fns.usda.gov/snap/contact_info/hotlines.htm).

Si aad u soo gudbiso cabasho takoor ee ku saabsan barnaamijka hela gargaar dhaqaale ee Dowladda dhaxe ah oo loo soo mariyo Waaxda Adeegyada Aadanaha Iyo Caafimaadka ee Mareykanka (HHS), u qor: HHS Director, Office for Civil Rights, Room 515-F, 200 Independence Avenue, S.W., Washington, D.C. 20201 ama wac (202) 619-0403 (cod) ama (800) 537-7697 (TTY).

Hay'addan waa hay'ad fursadda ay fidiso dadka u wada sinta

### **Xuquuqdaada dhegaysi hufan:**

**Ka waran haddii aadan ku qanacsanayn go'aanka aan ka gaarno arjigaaga ama kiiskaaga? Waxaad dalban kartaa rafcaan ah dhegaysi dacwad oo hufan. Adiga nafsi ahaantaada ayaa ka hadli kara dhegaysiga dacwadaada. Sidoo kale waxaad la iman kartaa saaxiib, qaraabo, ama qareen adiga kuu hadla. Ka dib marka aan jawaabta kuu so dirno, waxaad heysataa sagaashan (90) maalmood in aad rafcaan ka qaadato manfacyada Families First iyo manfacyada SNAP. Haddii aad dooneyso in ay kuu socoto manfacyada lagu siiyo inta racfaankaaga go'aan laga gaaraya, waa in aad toban (10) maalmood gudahooda soo weydiisataa Families First iyo SNAP Haddii rafcaanka aad ku guulaysan weydo, waxaa laga yaabaa inaad dib u bixiso manfacyada aad heshey ama qaadatay inta ay socdeen howsha racfaanka ee la go'aaminaayay. Haddii aad dooneyso in rafcaan aad qaadato, u sheeg shaqaalaha kiiskaaga ee xafiiska DHS jooga. Sidoo kale waxaad Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska ka soo wici kartaa 1-866-311-4287. Wacitaankan waa bilaash.**

### **Idan lagu sii bixinayo diiwaangelinta isa soo xaadirista iskuulka:**

IANiga (kalyantiga) waxaan iskuulka aan idan u siinayaa in ay bixiyaan diiwaangelinta soo xaadiritaanka caruurteyda ee la socda arjigaaga la siiyo Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee oo ay bixiso Waaxda Waxbarashada ee Tennessee ama iskuulka canugayga. Waaxda Adeegga Aadanaha wuxuu diiwaangelintan uu u isticmaali doonaa, oo ay ku jirto lambarada soshal sekiyuuritiga, in uu iga caawiyo in ka soo baxo waajibaadyadeda Mudnaanta Qoyska iyo diiwangelinta waa la baabi'in doonaa ka dib markii la dhamaysto.

### **idan aniga la igula soo xiriiro:**

Waan ku raacsannahay in DHS ay igala soo xiriiri karto dhanka Boostada Mareykanka iyo telfoon lambarka ku qoran arjigeeyga, oo fariin ayaa la ii dhaafi karaa haddii aanan aniga markaa la i helin, sida looga baahan yahay in aan bixiyo macluumaad ku saabsan arjigeeyga ah manfacyada/adeegyada ama manfacyada/adeegyada ee aan horeyba u helo.

*Shaqaalaha [Waaxda Adeegga Bulshada ee Tennessee] [TDHS] waa inay hubiyaan "Foormamka" qaybta intaraanatka si loo xaqiijiyo in foormka ugu dambeeyay la isticmaalayo [DHS staff should check the "Forms" section of the intranet to ensure the use of current versions.] Foormamka waxba laga ma bedelli karo iyadoo oggolaansho hore aanan loo haysan [Forms may not be altered without prior approval].*

Qaybin: FARAS (asal)

HS-0169 (Dib loo cusboonaysiiyay (04-21)

RDA: 1716

Bogga 8 oo ka kooban 8 bog